Co-funded by the European Union

CASHARKA 4: SAHMINTA MAGAALADAADII HORE

Qore: Xana Kozak

Faallada macallinka:

Sanadkii la soo dhaafay, aad ayaan ugu farxay ka qaybgalka mashruuca "Your Language Counts". Qorshahaas tijaabada ahaa wuxuu ahaa mid si cad oo wanaagsan loo habeeyay, waxaana dareemay in aan helay caawin aan ku gaari karo hadafkeyga. Wadaagista waayo-aragnimada macallimiinta waxay ahayd mid gaar ahaan qiimo leh oo dhiirrigelin badan leh.

Qorshayntayda iyo qorshahan tijaabada ah, aragtiyaha, iyo hawlaha la soo jeediyay ayaa hagayay shaqadayda, inkasta oo aan u habeeyay si ay ugu habboonaato xaaladda gaarka ah ee ardaydayda Yukreeniyaanka ah. Maadaama inta badan ardaydaydu aanay ku dhalanin Nederlaan oo aysanna damacsanayn inay muddo dheer halkaas sii joogaan, waxaan wax ka beddelay hawlo gaar ah si aan uga dhigo kuwo macno leh oo ku habboon xaaladdooda.

Ficil ahaan,afarta aragtoyood ee kala ah, —luqadda, aqoonta, aqoonsiga, iyo isdhexgalka dhaqamada—ayaa si dabiici ah isugu xidhan. Aragtida isdhexgalka dhaqamada ayaa ahayd midda ugu muuqda xaaladdayda, maadaama ardayda Yukreeniyaakanka ah ay ka yimaadeen deegaan aad u leh isdhexgal dhaqan. Mawduucaan wuxuu ahaa mid ka muuqday dhammaan hawlihii aan qabanay kaas oo, qaabeeyay doodahayaga, isbarbardhigyada, iyo fikradaha ku saabsan xaaladaha Yukreeniyaan iyo Nederlaanka labadaba.

"Guud ahaan, mashruucu wuxuu bixiyay qaab-dhismeed iyo dabacsanaan labadaba, wuxuuna bixiyey qaab-dhismeedka muhiimka ah ee waxbarashada kaas oo luqadda macno u leh gaar ahaan fasallada ardayda luqadaha badan ku hadla dhigtaan".

Casharka 1: Sahminta Magaaladaadii Hore (Ukrayn iyo Nederlaan)

Macnaha iyo Xiriirka Afarta Aragti:

Hawshani waxay ardayda u saamaxaysaa inay ku xirmaan **Aqoonsigooda shaqsiyeed** iyagoo ka fikiraya magaaladii ay asal ahaan ka yimaadeen oona isbarbardhigaya deegaankooda cusub ee Nederlaan. Waxay kor u qaadaysaa **Isdhexgalka Dhaqamada** iyadoo dhiirrigelinaysa wadaagista kala duwanaanshaha iyo isku ekaanshaha shakhsiga iyo dhaqanka. Ardaydu waxay raadinayaan **Aqoon** iyagoo baadhaya xog dhab ah oo ku saabsan magaalooyinkoodii hore iyo magaalooyinka ay hadda ku nool yihiin, iyo **Luuqadda** iyagoo ku tababaranaya erayada juqraafiga, dhaqanka, iyo dookhyada. Hawsha waxaa lagu hagaajin karaa iyadoo loo eegayo da'da iyo heerka luqadda: ardayda da'da yar ama heerka hoose waxay diiradda saari karaan hadalka oo keliya, halka kuwa waaweyn ama heerka sare ah ay qori karaan qoraallo gaagaaban ama soo bandhigi karaan.

Ujeeddo:

- Ku dhiirigeli ardayda in ay isticmaalaan aqoontoodii hore ee ku saabsan magaalooyinkoodii hore iyo meesha ay hadda ku nool yihiin.

- Horumari xirfadaha cilmi-baarista, hadalka, iyo fikirka isbarbardhigga.
- Dhis eraybixin oo ku tababar qaabeynta macluumaadka.

Waxyaabaha ku jira:

- Ardaydu waxay ka jawaabayaan su'aalo qoran oo ku saabsan magaalooyinkoodii hore ee Ukraine iyagoo xasuusanaya.
- Waxay baarayaan xaqiiqooyinka saxda ah iyagoo adeegsanaya internetka.
- Waxay ardaydu ku tababaranayaan magaalada ay hadda ku nool yihiin ee Nederlaan.
- Ardaydu waxay isbarbardhigayaan labada meelood oo waxay ka hadlayaan dookhyada, faa'iidooyinka, iyo khasaaraha.

Qaabka:

- Shaqo shaqsiyeed oo loogu talagalay ka jawaabista iyo cilmi-baarista.
- Wada sheekeysi laba-labo ama kooxeed si loo wadaago isbarbardhigyada.
- Ikhtiyaar: Ku soo bandhig qoraal kooban ama hadal ama ku qor boorar.

Talooyin ku saabsan qiimeynta Hawsha:

- Samee qiimeyn kooban oo ku saabsan xaqiiqooyinka juqraafiyeed ee magaalooyinkii hore ee ardayda iyo magaalooyinka ay hadda ku nool yihiin.
- **Isticmaal Jaantuska Venn:**
    - Jaantuska Venn waa qalab fudud oo la isku barbardhigi karo laba shay.
    - Waxay u eg tahay laba goobo oo is dul saaran.
    - Goobta bidix, ardaydu waxay ku qorayaan waxa gaarka ku ah ee ku saabsan magaalooyinkoodii hore.
    - Goobta midig, ardaydu waxay ku qorayaan waxa gaarka ku ah ee ku saabsan magaalada ay hadda ku nool yihiin.
    - Qaybta isdulsaaran ee dhexda ah, ardaydu waxa ay ku qorayaan waxa labada magaalo ay wadaagaan.
    - Marka hore, ku muuji tusaale fudud sabuuradda si qof walba u fahmo.
- Qoraal yar oo ka tarjumaya: "Maxaan u xiisay magaaladaydii hore" ama "Maxaan ka jeclahay magaaladayda cusub."

Casharka 2: Magaalada aan ku riyoonayo

Macnaha iyo Xiriirka Afarta Aragti:

Hawshan hal-abuurka ah waxay ku dhiirigelinaysaa ardayda inay sawiraan meesha ay riyada ku rabaan inay ku noolaadaan mustaqbalka, taasoo xoojinaysa **Aqoonsigooda** iyagoo ka tarjumaya fikrado shakhsiyeed. Waxay kor u qaadaysaa **Isdhexgalka Dhaqamada** (Interculturality) iyadoo

la aqoonsanayo in dad kala duwan ay qiimeeyaan dhinacyo kala duwan oo ku saabsan goobta lagu noolaado, iyadoo ku saleysan asal iyo waayo-aragnimo. Ardaydu waxay adeegsanayaan **aqoonta** ku saabsan juqraafiga, cimilada, iyo nolosha magaalooyinka ee casharkii hore. Xirfadaha lu**qadda** waxaa lagu horumariyaa iyada oo loo marayo hadal, qoraal, iyo soo bandhigid fikradahooda si cad. Hawsha waxaa lagu hagaajin karaa kooxo kala duwan: ardayda da'da yar waxay sawiri karaan magaalada riyadooda, halka kuwa waaweyn ay sameynayaan bandhigyo afka ah oo dhammeystiran.

Ujeeddo:

- Ka tarjum doorbidkaaga shakhsiyeed ee deegaanka aad ku noolaan lahayd.
- Horumari xirfadaha hadalka, qorista, iyo soo bandhigista.
- Ku xidh riyooyinkaaga shakhsiyeed sifooyin magaalo macquul ah.

Waxyaabaha ku jira:

- Ardaydu waxay buuxinayaan liiska hubinta (checklist) oo ku saabsan waxa muhiimka u ah iyaga magaalada ay jecelyihiin.
- Waxay si dhaliil leh uga fikirayaan: Ma ku habboon tahay magaalada riyadaaan ku sawiray liistada hubinta?
- Waxay diyaarinayaan oo ay soo bandhigayaan bandhig gaaban oo afka ah ama qoraal ah oo ku saabsan magaalada riyadoodo ee ay sawireen.

Qaabka:

- Liiska hubinta shakhsiyeed iyo fikir-curin (brainstorming).
- U diyaar garoowga shaqsiga ah ama labo-labo ee soo bandhigid gaaban oo afka ah.
- Banghigyo kooxeed si loogu tababaro hadalka fagaaraha dadweynaha.

Talooyin ku saabsan Tijaabinta Hawsha:

- Qaabka qiimeynta bandhigga: ku qiimee caddeynta, isticmaalka erayada, habeynta, iyo hal-abuurka.
- Talo bixinta ardayda: arday kasta wuxuu bixinayaa hal faallo wanaagsan ah iyo hal talo soo jeedin ah bandhig kasta.
- Qoraal kooban: 'Magaalada riyooyinkeyga waxay ahaan lahayd...' iyadoo la adeegsanayo erayada liiska hubinta.